**Aqoon-iswaydaarsiga Naqshada Dadweynaha ee Casriyeynta Dugsiga Sarre Cleveland Maalinta Sabtida, Noofembar. 18th**

Dugsiga Sarre Cleveland & Qoysaska Ardaydoodu Dhigato Cleveland,

Fadlan kala soo qeybgal saaxibadaa iyo dariskaaga Aqoon-isweydaarsiga ku saabsan Naqshada Dadweynha maalinta **Sabtida, Noofembar. 18th laga bilaabo marka ay saacadu tahay 10:00 subaxnimo ilaa Duhurkii Makhaayada Dugsiga Cleveland**.

La wadaag aragtidaada ku saabsan kooxda naqshada Dugsiga Sarre Cleveland taasi oo ku wajahan mustaqbalka! Nagala qeybgal hawlaha lagugu wargalin doono dhammaan dhismaha dugsigu sida uu u ekaan doono mustaqbalka.

Halkan Ka Fiirso Xayeysiiska Naqshada |Español | Tiếng Việt | Русский | Soomaali | 中文

**Waa La Soo Dhaweynayaa Dhammaan Aragtiyaha**
Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxay jecel yihiin inay dhageystaan aragtiyo badan oo kala duwan oo ay soo jeediyaan bulshada Cleveland.
Waxaa kulanka kuugu diyaar noqon doona Cunto iyo Cabitaan Fudud. Shaqaale caruurta kuu haya ayaa iyaguna diyaar ah haddii ay caruuri kuu soo raacdo kulanka (waxayna ku xiran tahay sida shaqaale loo helo), sidoo kale waxaa lagu siin doonaa addeegyada turjumaada luqada Soomaaliga. Waxaa diyaara ah turjumaada luqado dheeraad ah oo aad ka soo codsan kartaan halkan CHSBond@pps.net ama adiga oo soo wacaya Khadka telefoonka Casriyeynta Dugsiga ee 503 916-2222.

**Si joogta ah u booqo shabakada wixii macluumaad dheeraad ah**
Shabakada Casriyeynta Cleveland ee, www.pps.net/ClevelandBond waxay kula socodsiin doontaa wixii warar cusub ee soo kordha iyada oo aad ka heli doonto liistada fursadaha soo socda ee aad ka qeybgali karto. Waxaad sidoo kale aad qeyb ka noqon kartaa liistada fariimaha loo diro ee mashruuca Casriyeynta Dugsiga Cleveland CHSBond@pps.net.

Waxaan kaaga mahadcelineynaa sida aad noo taageeryso casriyeynta Dugsiga Sarre ee Cleveland ee qarniga 21naad.